UK Health
Security
Agency

NHS

# Sida ilmahaaga looga ilaaliyo RSV

## Hagaha tallaalka Fayraska Ku Dhaca Habdhiska Neefsashada (RSV) ee loogu talagalay haweenka uurka leh



**Haweenka waxay qaadan karaan talaal bilaash ah uur kasta, si ay dhallaankooda uga ilaaliyaan Fayraska Ku Dhaca Habdhiska Neefsashada (RSV).**

## Waa maxay sababta aan ugu baahan nahay inaan dhallaanka ka ilaalino RSV?

Fayraska ku dhaca habdhiska neefsashada ama RSV waa fayras caam ah oo sababi kara infekshanka sambabada ee loo yaqaanno 'bronchiolitis'. Dhallaanka yaryar, xaaladaas caafimaad waxay ku adkayn kartaa neefsashada iyo quudinta. Kiisaska badankood waxaa lagu maareyn karaa guriga laakiin ku dhawaad 20,000 oo dhallaan ah ayaa sannad kasta la dhigaa isbitaal sabab la xiriirta caabuqa 'bronchiolitis' ee gudaha England. Dhallaanka qaba caabuqa 'bronchiolitis' ee aadka u daran ayaa laga yaabaa inay u baahan tahay daryeel deg-deg ah oo caauqa wuxuu noqon karaa mid dilaa ah. RSV wuxuu u badan yahay inuu aad ugu daran yahay dhallaanka aadka u yaryar, ilmaha dhashay kahor wakhtiga caadiga ah ee dhalmada, iyo kuwa qaba xaalad caafimaad oo saamaysa wadnahooda, habdhiska neefsashada ama habdhiska difaaca jirka. Caabuqa RSV wuxuu qofka ku dhici karaa inta lagu jiro sanadka oo dhan laakiin kiisaska waxay aad u sareeyaan xilliga qaboobaha.

## Sidee ayuu RSV u faafaa?

RSV waa fayras aad u faafa oo si fudud ku faafa, gaar ahaan carruurta dhexdooda, iyadoo la isku marinayo qufaca iyo hindhisada. Xitaa adigoo raacaya cabbirrada sahlan sida gacamo-mayriska iyo daboolitaanka afkaaga iyo sankaaga marka aad hindhisayso, way adag tahay in laga fogaado in cudurka uu ku dhex faafo qoyska dhexdiisa. Sida ugu wanaagsan ee dhallaankaaga looga ilaaliyo caabuqa RSV waa inaad adiga qaadato tallaalka inta aad uurka leedahay.

## Sidee ayuu waxtar u leeyahay tallaalka RSV?

Tallaalku wuxuu kor u qaadaa habdhiska difaaca jirkaaga si uu u soo saaro unugyo/antiboodhi badan oo ka hortaga fayraska. Unugyadani waxay markaas ka gudbaan mandheerta si ay gacan uga gaystaan inay ilaaliyaan dhallaankaaga laga bilaabo maalinta ay dhashaan. Tallaalka RSV wuxuu 70% yareeyaa halista ah in qofka uu ku dhaco caabuqa 'bronchiolitis' ee aadka u daran 6da bilood ee ugu horreysa nolosha. Da'adaas ka dib dhallaankaagu wuxuu halis aad u hooseysa ugu jiraa qaadista caabuqa RSV ee aadka u daran. Carruurta qaangaarka ah iyo dadka waaweyn ayaa sidoo kale qaadi kara infekshanka RSV, laakiin cudurka waa mid aad u daran markuu ku dhaco dhallaanka yaryar iyo dadka da'doodu tahay 75 sano iyo wixii ka weyn.

## Goorma ayay tahay inaan qaato tallaalka?

Waa in lagugu siiyaa tallaalka waqtiga ballantaada uurka ee usbuuca 28. Haddii aadan qaadan xilligaas, la xiriir adeegga hooyooyinka ama xarunta dhallaanka ee GP-ga si aad ballan u qabsato. Qaadashada tallaalka usbuuca 28 ama dhowr toddobaad kadib wakhtigaas ayaa waxay kaa caawin doontaa in jirkaaga uu samaysto heer wanaagsan oo antiboodhi ah oo u gudbi kara dhallaankaaga kahor dhalashada. Tani waxay dhallaankaaga siin doontaa difaaca ugu wanaagsan, oo ay ku jirto xitaa haddii uu dhasho goor hore.

Waxaad weli qaadan kartaa tallaalka goor dambe ee uurkaaga laakiin waxaa laga yaabaa in waxtarka tallaalka uu yeraado. Haddii aysan suurtagal ahayn in aad qaadato tallaalka goor hore, waxaa lagu siin karaa ilaa aad ka dhasho cunuggaaga. Haddii aad qaadato goor dambe ee uurka, waxaa laga yaabaa in tallaalka uu weli kaa difaaco infekshanka isla markaana yareeyo halista ah inaad cudurka u gudbiso dhallaankaaga.

## Miyaan yeelan doonaa dhibaatooyin soo raaca?

Tallaalka inta badan waxaa lagu duraa cududaada sare waxaana laga yaabaa inaad kala kulanto xoogaa xanuun, guduudasho ama barar ah meesha lagaaga durey. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aad la kulanto madax-xanuun ama murqo xanuun muddo 1 ama 2 maalmood ah.

Dadka waaweyn ee waayeelka ah, xaalad caafimaad oo saamaysa habdhiska neerfaha oo qofka u horseedda daciifnimo, oo loo yaqaanno xanuunka Guillain-Barré, ayaa la soo sheegay inay **si dhif ah u dhacdo** ka dib qaadashada tallaalka. Isla xaaladaas caafimaad ayaa waxay sidoo kale dhacdaa ka dib marka qofka ay ku dhacaan dhowr cudur oo caadi ah iyo ka dib qaadashada qaar ka mid ah tallaalada kale. Xaaladaas caafimaad waxay aad ugu yar tahay dadka da'da yar, ilaa haddana, ma jirto caddayn muujinaysa in tallaalka RSV uu kordhiyo khatarta qaadista xanuunka Guillain-Barré ee haweenka uurka leh.

## Qaadashada tallaalka RSV inta lagu guda jiro uurka miyuu badbaado u yahay ilmahayga?

Tallaalka ayaa lagu soo daraasadeeyay tijaabooyin caafimaad oo ku dhawaad 4,000 haween ah waxaana la siiyay kumanaan haween ah oo ku jirey barnaamijyada qaranka. Marka loo eego Mareykanka, halkaas oo tallaalka lagu siiyay in kabadan 300,000 oo haween ah, waxaa lagu arkay in tallaalka uu leeyahay badbaado aad u wanaagsan. Daraasada caafimaad ee tijaabada ah ayaa waxaa lagu ogaaday in, bisha ka dambaysa qaadashada tallaalka, ay jireen tiro xoogaa yara badan oo dhallaanka dhiciska noqda ee kooxda qaadatay tallaalka (2.1%) marka loo barbardhigo kooxda aan qaadan tallaalka (1.9%). Farqiga meeshaas ka jira ayaa loo badinayaa nasiibka inuu sabab u yahay. Tallaalka waxaa ansixiyay maamulayaasha dawooyinka ee UK, Yurub iyo USA iyadoo lagu saleynayo difaaca, tayada iyo badbaadada.

## Qaadashada tallaalku miyey ka dhigan tahay in ilmahaygu uusan qaadi doonin caabuqa RSV?

Tallaalka ayaa la arkay inuu yareeyo fursadda ah in ilmahaaga uu qaado cudurka RSV ee aadka u daran. Si la mid ah dhammaan dawooyinka, ma jiro talaal si dhammaystiran waxtar u leh, waxaana laga yaabaa in ilmaha qaarkood ay weli qaadaan caabuqa RSV in kasta oo ay hooyadood tallaalka qaadatey. Si kastaba ha noqotee, inta badan dhallaanka ay dhalaan hooyooyinka la tallaalay, wixii caabuqa RSV ah ee ku dhaca waxay noqonayaan kuwo aan darnayn.

Waxaad halkan ka akhrisan kartaa buug-yeraha macluumaadka bukaanka ee tallaalka RSV: **www.medicines.org.uk/emc/product/15309/pil**

## Maxaa dhacaya haddii ilmahayga uu ku jiro khatar aad u sareysa?

Dhallaanka qaarkood ee halista sare ugu jira RSV, sida kuwa dhiciska ah, kuwa qaba cudurka wadnaha ee aadka u daran ama kuwa habdhiska difaaca jirkooda uu daciifka yahay ayaa sidoo kale la siin karaa cirbad antiboodhi/ka hortag ah. Cirbaddan ayaa siin doonta difaac dheeraad ah oo ka sokow antiboodhiga ay ka helaan hooyadood.

## Miyaan u baahanahay inaan tallaalka RSV qaato uur kasta?

Haa, waa inaad qaadataa uur kasta si aad ilmahaaga u siiso difaaca ugu wanaagsan.

## Miyaan qaadan karaa tallaallada kale ee la siiyo hooyooyinka isla waqtiga aan qaadanayo tallaalka RSV?

Waa muhiim inaad qaadato tallaalladaada waqtiga saxda ah ee xilliga uurka:

- tallaalka xiiq-dheerta waxaa badanaa la bixiyaa wakhti hore ee uurka (waqti ku dhow waqtiga baaritaanka bartamaha uurka, oo badanaa ah usbuuca 20)
- waa inaad qaadataa tallaalkaaga RSV marka aad gaarto usbuuca 28 ee uurka
- tallaalka hargabka waxaa la qaadan karaa xilli kasta oo uurka ah. Waa inaad qaadataa sida ugu dhakhsaha badan isla marka uu diyaar kuu noqdo

Markii laguugu yeero qaadashada tallaalka RSV, haddii aadan wali qaadan tallaalada xiiq-dheerta ama hargabka, markaas isku wakhti ayaad wada qaadan kartaa.

## Xageen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Waad la hadli kartaa umulisadaada ama xarunta GP-gaaga waxaadna buug-yaraha ka akhrisan kartaa khadka tooska ah ee halkan:

**www.gov.uk/government/publications/respiratory-syncytial-virus-rsv-maternal-vaccination**

**www.nhs.uk/pregnancy/keeping-well/vaccinations**

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan talaallada lagu siin doono marka aad uurka leedahay waxaa laga heli karaa:

**www.gov.uk/government/publications/pregnancy-how-to-help-protect-you-and-your-baby**

### Ilmahayga ma qaadi karaa caabuqa ‘RSV bronchiolitis’?

Astaamaha caabuqa ‘RSV bronchiolitis’ waxaa ka mid ah:

- sanka oo diif ka socda ama xirma
- Neefsashada oo qofka ku adkaata, boobsiis ku noqota ama sawaxan leh (hindhidaad)
- quudinta oo adkaata
- quficid
- qandho
- aan salka dhul dhigayn ama ay adag tahay in la aamusiyo
- daal ama tamar la’aan

Caabuqa RSV wuxuu sidoo kale carruurta yaryar u keeni karaa xaalado kale oo caafimaad sida qufaca jiidjiidma (croup) iyo cabbuq xanuun badan oo dhegta gudaheeda ah (otitis media).

### Codso ballan GP oo degdeg ah ama wac 111 haddii:

- ilmahaaga uu ku dhacay hargab uuna ka sii darayo
- Ilmahaagu uu quudsanayo ama cunayo wax ka yar sidii caadiga ahayd
- ilmahaaga uusan saxaroon/kaadin 12 saacadood ama wax ka badan, ama muujiyo astaamo kale oo fuuq-bax ah
- ilmahaaga uu ka yar yahay 3 bilood uuna leeyahay heerkul ah 38°C, ama ka weyn yahay 3 bilood uuna leeyahay heerkul ah 39°C ama wax ka sareeya

### Wac 999 ama tag A & E haddii:

Ilmahaaga uu u muuqdo mid si xun u xanuunsan, ku kalsoonow go'aankaaga. Waa inaad ficil samaysaa haddii:

- ilmahaaga uu dhib ku qabo neefsashada – waxaa laga yaabaa inaad ku aragto dhawaaqyo gununuc ah ama xabadka iyo caloosha oo gala gudaha lafaha feeraha
- ay jiraan joogsiyo marka ilmahaaga uu neefsanayo
- maqaarka, carabka ama bushimaha ilmahaaga ay buluug yihiin
- ulmahaaga uu yahay mid dhacdhacaya oo aan hurdada ka soo toosayn ama iska soo jeeda

Waxaad waxyeellooyinka gaarka ah ee laga shakiyo ku soo gudbin kartaa websaydka Yellow Card ama adigoo wacaya khadka taleefanka bilaashka 0800 731 6789 (9am ilaa 5pm Isniinta ilaa Jimcaha) ama adigoo la soo degaya ablikeeshinka Yellow Card.

**www.mhra.gov.uk/yellowcard**



© Crown copyright 2025. Version 3. UK Health Security Agency Gateway Number 2024-935.
Product code: V2C24RSV03SO Somali 2p 100K FEB 2025 (APS).
To order more copies of this asset, please visit: **www.healthpublications.gov.uk** or call **0300 123 1002**.This leaflet is available as a BSL video, and audio file, in Braille, large print and translated into 30 community languages.